



REPUBLIC OF SOMALILAND
HARGEISA MUNICIPALITY

JAMHUURIYADA SOMALILAND
DAWLADA HOOSE HARGEYSA

Go'aan Lr: 90 /2022

Date: 13th August 2022

Go'aan Guddi Fulneed:

Shir ay isugu yimaadeen guddida fulinta caasimadda Hargeysa maanta oo ay bishu tahay 13th August 2022 shir gudoomiyena ka ahaa Duqa Caasimadda (C/kariin Axmed Mooge), kuna saabsanayd Cancell gareen fayl, dood iyo falan qayn dheer ka dib.

Wuxuu Go'aansaday:-

Markuu Arkay:-

Sharciga wasaaradda arimaha gudaha
Ismaamulka Gobalada iyo Degmooyinka JSL.

Markuu Arkay:-

Tixraaca warqada ku suntan
MHG/DFL/551/2018 ee taariikhaysan 13th
August 2022 ujeedadeedu tahay Amar
baabiin Sharci, kana soo baxday Garsooraha
Maxkamadda Gobolka M/Jeex (Isaxaaq
Yaasiin Cabdi).

Markuu Arkay:-

In muwaadinka Mustafe Mahad Mooge inuu
sharciyeystey dhul aanu lahayn oo ku
yaala Degmadda A/dhagax gaar ahaan
Masalaha Galbeed cabirkiisuna Dhan yahay
24x36m Tr yahay 18551 jihooyinkiisuna
kala yihiin:-barri & waqooyi waddo,
Galbeed & koonfuna Dhisme.

Markuu Xaqiiqsaday

Inay laga maarmaan tahay in la cancell
gareeyo faylkaasi loo sharciyeey muwaadka
magaciisu sare ku xusan yahay ee ay ka
xukuntay Maxkamada Gobolka M/Jeex.

Markuu Tixgaliyay

: Tallada masuuliyiinta hawshani khusayso



Gudiga Fulintu:-

Kadib markuu arkay dhamaan asbaabahaasi sare ku xusan guddida fulintu wuxuu go'aansaday in la cancell gareeyo faylka uu ku qoran yahay Mustafe Mahad Mooge TR numberkiisuna yahay 18551, kuna yaala degamda A/dhagax xaafada Masalaha cabirkiisuna yahay 24x36m lana process gareeyo faylka sharciga ah ee muwaadin Kayse Cabdi Shaybe oo iska leh dhulka loo sharciyeey muwaadinka kor ku xusan ee ay ka xukuntay Maxkamada Gobolka Maroodi Jeex.

Siciid Nuur Aw Jaamac
Xoghayaha Fulinta D/hoose Harg
Xoghayaha Golaha Deegaanka Harg.

(Khadar Axmed Cumar (Khadar Nuur)
Ku Xigeenka Duqa Caasimada ahna
Gud/K/Xigeenka Golaha Deegaanka Harg

(C/kariin Axmed Mooge)
Duqa Caasimada Hargaysa Ahna
Gud.Golaha Deegaanka Hargaysa





AMHUURIYADDA SOMALILAND

REPUBLIC OF SOMALILAND

MAXKAMADDA GOBOLKAM-JEEX / REGIONAL COURT M-JEEX

MGH/DFL/551/2018

Date 13/08/2022

KU:- Maayirka Caasimada Hargaysa

=Hargaysa=

KU:-Maayir Xigeenka Caasimada Hargaysa

=Hargaysa=

KU:- Xog-haya Fulinta Ee DHH

=Hargaysa=

OG:- Gudoomiyaha Degmada Ahmed Dhagax

=Hargaysa=

OG :- Loo Fuliye :- Kayse Cabdi Shaybe

=Hargaysa=

OG:- Lagu- Fuliyaal :- Cabdi Yuusuf Geele

=Hargaysa=

Faarax Xasan Cilmi


=Hargaysa=

Ismaaciil Cabdi Jacfaan

=Hargaysa=

Abshir Xasan Xaashi

=Hargaysa=



UJEEDO: Amar Baabiin Sharci.

Maxkamada Gobolka M/jeex Hargaysa:-

Markay Aragtay:- Galdacwadaeedka Fulinta ah ee Sumadiisa iyo
Dhinacyadiisuba Sare Ku Xusan Yihiin.

Markay Aragtay:- Nootayada Sumadeedu Tahay

REF/XNM4R/H-15/2005 , Kuna Tr:-

19/02/2005 , Kana Soo Baxday Xafiiska

Nootayada Ee Sharciga Ah Ee Maxamed

Rashaad Notory , Taas Oo U jeedadeedu

Tahay Heshiis Iksu Badal Baabuur iyo Dhul.

Markay Aragtay:-Digniinta fulinta ah Ee Sumadeedu Tahay

MGH/DFL/551/2018 , Kuna Tr:- 27/04/2019 ,

Kana Soo Baxday Maxkamadda Gobolka

M/Jeex Hargaysa Kaas Oo Maxkamadu

Ku Amartay Lagu Fuliyaasha In Ay Ku

Wareejiyaan Dhulka Cabirkiisu Yahay (48x36

Mitir) Muddo 10 Cisho ah Kuna Yaala Degmada

Ahmed Dhagax Gaar Ahaan Xaafada Masalaha
Galbeed Jihooyinkiisuna Kala Yihiin .
1.Barri/Koonfur /Waqooyi = Waddo .
2. Galbeed = Dhisme.

Markay Aragtay:- Qaraarka Maxkamadda Rafcaanka Gobolka
M/Jeex Hargaysa Ee Sumadiisu Tahay ,
MRGMJ/DMRL/222/2019 , Ee Ku Tr :-
23/11/2019.

Markay Aragtay:- Asbaabtaas Sare Ku Xusan Iyo Qodobada
Sharci Iyo 272,279,338,343,284,285 XHM,

Markay Aragtay:- Dhamaan Asbaabaha sare ku Xusan Dartood
Waxay Maxkamaddu Soo Saartay Amarkan
Fulinta Xoogan ah .

Amar Baabiin Sharci .

- Maxkamaddu Waxay ku Amraysaa Maayirka Caasimada
Hargaysa in aad Baabiiso Wixii File Ama Qoraal Kasoo
Baxay Dhulka Cabirkiisu Yahay (48x36 Mitir) Kuna Yaala
Degmada Ahmed Dhagax , Gaar Ahaan Xaafada Masalaha
Galbeed. Jihooyinkiisuna Kala Yihiin ,
- Barri/Koonfur/Waqooyi=Waddo .
- Galbeed = Dhisme , Ee Ay Maxkamadu U Fulisay , Loo
Fuliye :- Kayse Cabdi Shaybe.
- Amarkan Waxaa Uu Soo Baxay Taariikhdu
Tahay 13/08/2022.

(Isaxaaq Yaasiin Cabdi)

Garsooraha Maxkamada

= H a r g a y s

“C.baari Cismaan C.laahi” Donyayste

Kaaliyaha Maxkamada Gobolka M/jeex

=Hargeysa=

